

## Qoraallada Dawooyinka OTC



Dawooyinka aad iska iibsan kartid adiga oo aan haysan warqadda dhakhtarka waxa la yidhaahdaa dawo la iska iibsado oo Ingiriisiga ah "over-the-counter" ama "OTC".

Qoraallada waxa ku qoran dhaman warka aad u baahan tahay si aad si sax ah dawada u dooratid, isla markaana si sax ah u isticmaashid.

Kanii waxa uu tusaale u yahay qoraalka weheliya dawo OTC. Waxa ku qoran "Xaqiiqooyin Dawo" oo muhiim ah.

<b>Drug Facts</b>	
<b>Active ingredient (in each tablet)</b> Chlorpheniramine maleate 2 mg	<b>Purpose</b> Antihistamine
<b>Uses</b> Temporarily relieves these symptoms due to hay fever or other upper respiratory allergies: <input type="checkbox"/> sneezing <input type="checkbox"/> runny nose <input type="checkbox"/> itchy, watery eyes <input type="checkbox"/> itchy throat	
<b>Warnings</b> Ask a doctor before use if you have: <input type="checkbox"/> glaucoma <input type="checkbox"/> a breathing problem such as emphysema or chronic bronchitis <input type="checkbox"/> trouble urinating due to an enlarged prostate gland Ask a doctor or pharmacist before use if you are taking tranquilizers or sedatives <b>When using this product</b> <input type="checkbox"/> drowsiness may occur <input type="checkbox"/> avoid alcoholic drinks <input type="checkbox"/> alcohol, sedatives, and tranquilizers may increase drowsiness <input type="checkbox"/> be careful when driving a motor vehicle or operating machinery <input type="checkbox"/> excitability may occur, especially in children If pregnant or breast-feeding, ask a health professional before use. Keep out of reach of children. In case of overdose, get medical help or contact a Poison Control Center right away.	
<b>Directions</b>	
adults and children 12 years and over	take 2 tablets every 4 to 6 hours; not more than 12 tablets in 24 hours
children 6 years to under 12 years	take 1 tablet every 4 to 6 hours; not more than 6 tablets in 24 hours
children under 6 years	ask a doctor

"Walaxda Firfircoon" ayaa ku tusaysa magaca ay saynis ahaan dawadu leedahay. Waxa kale oo tani ku tusaysaa qadarka qaadashada. Kiniin kastaa waxa ku jira 2 miligaraam oo ah walaxda firfircoon.

<b>Drug Facts</b>	
<b>Active Ingredient (in each tablet)</b> Chlorpheniramine Maleate 2 mg	<b>Purpose</b> Antihistamine

"Isticmalku" waxa uu kuu sheegayaa calaamadaha ama dhibaatooyinka dawadu daweyso. Tan waxa lagaga nafisaa calaamadaha alerjiga, sida hindhisada iyo san duuf ka da'ayo.

**Uses temporarily relieves these symptoms due to allergies** n **sneezing** n **runny nose**

"Digniin" waxay kuu sheegaysaa qof aan isticmaali karin dawadan. Haddii aad leedahay gulukooma (glaucoma) ama sambab barar (emphysema). Haddii aad qabtid gulukooma ama sambab barar waa inaad dhakhtarkaaga weydiisid ka hor intaanad isticmaalin dawadan.

**Warnings**  
**Ask a doctor before use is you have**  
n **glaucoma** n **a breathing problem such as emphysema**

"Digniin" waxay kuu sheegaysaa waxa aad sameyn kartid iyo waxa aanad sameyn karin marka aad qaadatid dawadan. Haddii aad qaadatid dawadan, waa inaad taxadir yeellatid marka aad wadaysid baabuur.

**Warnings**

*When using this product*

n *be careful when driving a motor vehicle or operating machinery*

n *drowsiness may occur*

"Digniin" waxa kale oo ay taxaysaa waxyeellooyinka dawada ee suurogalka ah. Dawadani waxay keeni kartaa lullo ama hurdo-hurdo.

"Fariimo" waxay sharaxaysa sida loo isticmaalo dawadan. Dadka waaweyn iyo caruurta ka weyn 12 sannadood waxay qaadan karan 2 kinnin ah 4-tii ilaa 6-dii saacadood kasta. Caruurta u dhexeysa 6 iyo 12 sannadood waa inay qaataan kaliya 1 kiniin ah. Weydii dhakhtarka ka hor intaanad dawadan siin ilmo ka yar 6 sannadood.

**Directions**

*Adults and children 12 and over*

*take 2 tablets every 4 to 6 hours  
not more than 12 tablets in 24 hours*

*Children 6 years to under 12 years*

*take 1 tablets every 4 to 6 hours  
not more than 6 tablets in 24 hours*

*Children under 6 years*

*ask a doctor*

Marna ha qaadan dawo ka badan inta ay fariimuhu kuu sheegayaan.

Dawooyin badan ayaa lagu iibiyaa weel leh fur aanay caruurta furi karin. Dawooyinku waxay sumeyn karaan caruurta. Xusuuso inaad dhamaan dawooyinka ka fogeysid aragga iyo tiigsiga caruurta.



Habka ugu wacan ee naftaada aad ku daryeeli kartid marka aad isticmaalaysid dawo waxa weeye adiga oo akhriya qoraalka dawada. Haddii uu jiro wax aanad fahmin, weydii farmasiilaha.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan dawooyinka dhakhtarku soo qoro ka eeg Qoraallada Dawooyinka Dhakhtarku Qoro.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan qoraallada digniinta ah ka eeg Qoraallada Digniinta ah.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan waxyeellooyinka dawooyinka ka eeg Waxyeellooyinka.